




## Qorshaynta waxbarashada sannadaha 11 iyo 12

Dugsiga sare waa wakhti xiiso u leh ardayda Queensland isla markaana waa tallaabo muhiim ah oo ay ugu diyaargaroobayaan mustaqbalkooda.

Dugsiyadu waxay la shaqeeyaan ardayda Year 10 iyo qoysaskooda si ay uga caawiyaan qorshaynta waxbarashadooda, tababarkooda iyo yoolalka shaqo iyo jihada dariiqa ay u marayaan Shahaadada Waxbarashada Queensland (Queensland Certificate of Education - QCE).

## Shahaadada Waxbarashada Queensland (The Queensland Certificate of Education - QCE)

QCE waa shahaadada dugsiga sare ee Queensland. Waa mid caalami ah oo la aqoonsan yahay waxayna calaamad u tahay guusha tacliinta iyo tan shaqsigaba.

QCE-du waxay u ogolaataa ardayda inay qaabeeyaan dariiqa iyaga ku habboon - iyo in haddii hadafyadooda wixii ka dambeeya Sannadka 10-aad ay noqoneyso:

- inay jaamacad dhigtaan
- helaan shaqo xirfad leh
- dhigtaan TAFE ama sameeyaan tababar kale.

Ardaydu waxay dooran karaan maaddooyin iyo koorsooyin kala duwan, oo ay ku jiraan Manhajka Queensland iyo Maamulka Qiimaynta (Queensland Curriculum and Assessment Authority - QCAA), maaddooyinka, waxbarashada farsamada iyo tababarka (VET), tababarro waxbarasho oo iskuulka lagu sameynayo iyo tababarro caadi ah ama koorasyo kale oo la aqoonsan yahay.

## Sidee QCE u shaqeysaa?

Si loo gaadho QCE, ardaydu waxay u baahan yihiin inay dhammaystiraan qaddar waxbarasho oo go'an, kaas oo loo dhameystirayo qaabka loo dejiyay, ayna soo buuxiyaan shuruudaha akhrinta-qoraalka iyo xisaabta:

**Qiimo go'an**

20 dhibcood oo laga helay koorsooyinka wax ku biirinta ee daraasadda, oo ay ku jiraan:

- Maadooyinka ama koorsooyinka ay QCAA samaysay
- waxbarashada farsamada gacanta iyo shahaadooyinka tababarka
- waxbarashada aan Queensland lagu baran
- daraasado la aqoonsan yahay.

**Heer degsan**

Dhammaystir lagu qanco, darajada C ama ka wanaagsan, karti ama dhammaystirka shahaado, baasitaan ama wax u dhigma.

**Hab degan**

12 dhibcood oo laga helay koorsooyinka aasaasiga ah ee daraasadda iyo 8 dhibcood oo laga helay isku-dhaf kasta oo ah:

- Asaasiga
- Diyaarinta (ugu badnaan 4)
- Dhameystir (ugu badnaan 8).

**Aqriska iyo xisaabadka**

Ardaydu waa inay buuxiyaan shuruudaha akhrinta qoraalka iyo xisaabta iyadoo loo marayo mid ka mid ah fursadaha waxbarasho ee jira.

## Maadooyinka a iyo koorasyada

Maadooyinka iyo koorasyada kala duwan ayaa ku biirin kara dhibcaha QCE.

Ardayda badankoodu waxay baran doonaan lix maaddo/koorsooyin sannadaha 11 iyo 12. Qaar badan ayaa doorta inay ku darsadaan koorsooyinka VET oo qayb ka ah dariiqa QCE-da qaarkoodna waxay doortaan inay sii wataan waxbarashadooda maaddooyinka jaamacadda ama koorsooyinka kale ee la aqoonsan yahay.

Debecsanaanta QCE waxay ka dhigan tahay in ardaydu dooran karaan dariiqa ku habboon hadafkooda.

Shuruudaha hannaanka la dejiyay dhexdiisa, waxa jira saddex qaybood oo wax-barashada — Kuwa muhiimka ah (Core, Kuwo kuu diyaarinaya (Preparatory) iyo kuwo Lagu kabayo (Complementary). Marka heerka la dajiyay la buuxiyo, dhibco ayaa ku soo kordhaya koontada waxbarashada ardayga.

### Maadooyinka guud ee QCAA — Qaybta muhiimka ah ee waxbarashada

Maadooyinka guud waxay ardayda u diyaariyaan waxbarasho heer jaamacadeed, waxbarasho dheeraad ah iyo tababar iyo shaqo. Waxay ku biiriyaan **ilaa afar dhibcood maaddo kasta** QCE waxayna sidoo kale gacan ka geystaan darajada gelitaanka jaamacadeed ee Australia (ATAR). Tusaale waxaa ka mid ah Ingiriisiga, Xisaabta Guud, Taariikhda Qadiimiga ah, Biology iyo Ekstenshan Muusiga.

### Maadooyinka QCAA ee la dabaqay — Qaybta muhiimka ah ee waxbarashada

Maadooyinka la dabaqay waxay diiradda saaraan xirfadaha la taaban karo waxayna ardayda u diyaariyaan waxbarasho iyo tababar iyo shaqo dheeraad ah. Waxa laga yaabaa in ay ku biiriyaan **ilaa afar dhibcood maaddo kasta** QCE, iyo hal maado la dabaqay waxa kale oo laga yaabaa in ay wax ku biiriyaan ATAR marka lagu daro afar maaddo oo Guud. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah Af-Ingiriisiga Muhiimka ah, Xisaabta Muhiimka ah, Daraasadaha Ganacsiga, Xirfadaha Farsamada Warshadaha iyo Dalxiiska.

### Koorasyada Gaaban ee QCAA — Qaybta diyaarinta ama dhammaystirka waxbarashada, waxayna ku xiran tahay koorsada

Koorasyada gaaban waxay ku habboon yihiin ardayda xiisaynaysa dariiqyada loo maro waxbarashada farsamada gacanta iyo tababarka ama waxbarasho dheeraad ah iyo shaqo. Waxa laga yaabaa inay ku kordhiyaan **hal credit QCE**, laakiin waxba kuma kordhinayaan ATAR. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah Koorso Gaaban oo barashada qoraalka ah, Koorso Gaaban oo xisaabta ah iyo Koorso Gaaban oo Luuqadaha Asaliga ah & Torres Strait Islander.

### Waxbarashada farsamada gacanta iyo tababarka (VET) — Qaybta ubucda, diyaarinta ama dhamaystirka waxbarashada, waxayna ku xiran tahay koorsada

VET waxay ardayda u diyaarisaa shaqada iyadoo loo marayo barasho la taaban karo waana qayb muhiim ah oo ka mid ah waxbarashada sare ee arday badan. Ku dhawaad 60% ardayda sare ee Queensland waxay gaaraan shahaadooyinka VET. Sannadihii u dambeeyay koorsooyinkii ugu caansanaa waxay ahaayeen ganacsiga, macluumaadka iyo tignoolajiyada isgaarsiinta (information & communication technology - ICT), soo dhawaynta, dhismaha, jimicsiga, iyo ciyaaraha iyo madadaalada.

VET waxay sidoo kale horseedi kartaa waxbarasho iyo tababar dheeraad ah waxayna ku biirin kartaa **ilaa sideed dhibcood koorso kasta** QCE da. Tirada dhibcaha way kala duwanaan doontaa, waxayna ku xiran tahay nooca shahaadooyinka. Mid ka mid ah shahaadooyinka VET ee Shahaadada III ama wixii ka sareeya ayaa sidoo kale wax ku biirin kara ATAR.

### Koorsooyin kale — Qaybta aasaasiga ah, diyaarinta ama dhamaystirka waxbarashada, waxayna ku xiran tahay koorsada

Koorasyada kale waxay u oggolaanayaan ardayda inay bartaan meel gaar ah oo ay daneynayaan, iyagoo u maraaya shahaadooyin iyo abaal-marin la aqoonsan yahay, ama maaddooyin jaamacadeed oo la bartay inta ay dugsiga ku jiraan. Dhibcaha QCE iyo u-qalmitaanka ATAR way kala duwanaan doonaan, waxayna ku xiran tahay koorsada. Daraasadaha aan-Queensland lagu baran sida International Baccalaureate ama koorsooyinka lagu soo sameeyay gobolada kale ayaa sidoo kale lagu daray qaybtan.





## Qiimaynta

Sida ardayda loo qiimeeyo sannadaha 11 iyo 12 waxay ku xidhan tahay waxay bartaan.

- **Maadooyinka guud ee QCAA**

  Maaddooyinka guud waxay leeyihiin saddex qiimayn oo gudaha ah (waxaa dejiyay isla markaasna saxa iskuulaadka) iyo hal qiimayn oo dibadda ah (waxaa dejiyay isla markaasna saxa QCAA). Maadooyinka intooda badan, qiimaynta dibeddu waxay ku biirisaa 25% natiijada mawduuca ugu dambeeya. Maadooyinka Xisaabta iyo Sayniska, qiimaynta dibadda waxa ay ku biirisaa 50%. Ardayda barata maaddo kasta waxay isku mar u fadhiisan doonaan imtixaanada dibadda ee dugsiyada Queensland.

- **Maadooyinka QCAA ee la dabaqay**

  Maadooyinka la codsado waxay leeyihiin afar qiimayn oo gudaha ah (waxaa dejiyay isla markaasna saxa iskuulaadka). Ingiriisiga Asaasiga ah iyo Xisaabta Aasaasiga ah, mid ka mid ah qiimeynta ayaa ah qiimeyn guud oo gudaha ah (waxaa dejiyay isla markaasna saxa QCAA).

- **Koorasyada Gaaban ee QCAA**

  Koorasyada gaaban waxay leeyihiin laba qiimayn oo gudaha ah (waxaa dejiyay isla markaasna saxa iskuulaadka).

- **VET**

  Qiimaynta VET way kala duwanaan doontaa, waxayna ku xiran tahay nooca koorsada. Waxa ku jiri kara indho-indhayn, qiimayn qoraal ah, su'aalo weydiin, muunado shaqo ama ra'yi ka yimid dhinac saddexaad.

- **Koorsooyin kale**

  Qiimaynta koorsooyinka kale way kala duwanaan doontaa, waxayna ku xiran tahay koorsada.

## Habaynta gelitaanka iyo hagaajinta macquulka ah

Nidaamyada gelitaanka iyo hagaajinta macquulka ah (Access arrangements and reasonable adjustments - AARA) waxaa loogu talagalay ardayda laga yaabo inay leeyihiin naafonimo, itaaldarro iyo/ama xaalado caafimaad ama xaalado la kulma kuwaas oo caqabad ku noqon kara waxqabadkooda qiimaynta. Haddii aad u malaynayso in ilmahaagu u baahan karo AARA si uu u dhamaystiro qiimaynta, fadlan la hadal dugsigooda.

## Gelitaanka waxbarashada jaamacada

Heerka Ogolaanshaha Jaamacadaha Australia (The Australian Tertiary Admission Rank - ATAR) waxaa loo isticmaalaa in lagu xusho ardayda iskuulka ka baxeysa ee galeysa jaamacad. ATAR waxa loo istcimaalaa qaran ahaan waxana ay muujisaa booska ardayga marka loo eego ardayda kale ee u qalma ATAR. Queensland ATAR keeda waxay ku salaysan yihiin ardayga:

- shantooda maado ee ugu natiijooyin fiican, ama
- natiijooyinka ugu fiican ee afar maaddo Guud, lagu daray hal maado la dabaqay, ama
- natiijooyinka ugu fiican ee afar maaddo oo Guud ah, oo lagu daray hal shahaado VET ee Shahaadada III ama ka sareeysa.

Xarunta Ogolaanshaha Waxbarashada Sare ee Queensland (The Queensland Tertiary Admissions Centre - QTAC) waxay xisaabisaa oo soo saartaa ATARs ka ardayda Year 12. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli doontaa shabakadeeda: www.qtac.edu.au.

## Shahaadada Guusha Shaqsiga ee Queensland (Queensland Certificate of Individual Achievement - QCIA)

QCIA waxay aqoonsata oo ka warbixisaa guulaha ardayda ay waxbarashadooda ay qayb ka tahay barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah. Si aad ugu qalanto, ardaydu waa in ay leeyihiin iin ama ay dhibaato ku qabaan dhanka waxbarashada taas oo aysan sababta ugu weyn aysan eheen dhaqaale-bulsho, dhaqan ama mid luqadeed.

## Natiijooyinka iyo warbixinta

Natiijooyinka maadada ugu dambeysa ee ardayga iyo QCE waxaa laga heli karaa Xariirka Ardayga iyada oo loo sii marayo mareegaha myQCE bisha Diseembar - dhamaadka sanadka 12.

## More information

**myqce.qcaa.qld.edu.au**

myQCE mareegta ah waxaad ka helaysaa macluumaad ku saabsan maadooyinka iyo koorsooyinka, qiimaynta iyo natiijooyinka, talooyinka waxbarasho iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah. Kala hadal dugsigaaga maaddooyinka iyo koorsooyinka uu bixiyo.

**qcaa.qld.edu.au**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan manhajka dugsiga sare iyo qiimaynta, oo ay ku jiraan manhajyada maadooyinka QCAA, ayaa laga heli karaa mareegaha QCAA.

240461

Agoosto 2024

# Dugsiga sare ee Queensland

Hagaha waalidiinta iyo daryeelayaasha



Queensland Government | QCAA Queensland Curriculum & Assessment Authority

*Dhammaan dugsiyada Queensland*